

Tirakoobka 2020 Ilaalinta Iyo Sugidda Xogta



Jawaabahaaga tirakoobka 2020 waa kuwa ilaashan.

Jawaabahaaga tirakoobka 2020-ka waxaa ilaaliyay oo sugay sharciga. Sida ku xusan xeerka 13 ee sharciga Mareykanka, Xafiiska Tirakoobka Mareykanku ma siideyn karo macluumaad kasta oo si gaar ah laguugu aqoonsanayo. Shaqaale kasta oo ka tirsan Xafiiska Tirakoobka iyo qandaraasle waxaa lagu dhaariyaa nolashiisa inuu had iyo jeer ilaaliyo macluumaadkaaga. Ku xadgudubka dhaartaasi waxay keensanaysaa ganaaxyo adag dhammaan shaqaalaha Xafiiska Tirakoobka - ganaax gaaraya \$ 250,000 iyo / ama illaa shan sano oo xabsi ah.

Xafiiska Tirakoobku wuxuu u isticmaalaaya macluumaadkaaga ujeedooyin tirakoob ahaan oo kaliya, sida ka caawinta go'aan qaadashada isbitaalada cusub, iskuulada iyo wadooyinka.

Jawaabahaaga tirakoobka 2020 waa kuwa Sugan.

Xafiiska Tirakoobku wuxuu leeyahay koox khabaro ku xeel dheer arimaha internetka oo kormeera oo ilaaliya dhammaan teknoolajiyadda hay'adda saacad kasta. Ilaalintayada elektarooniga ah waa mid ku sargo'an heerarka ugu sareeya ee ilaalinta macluumaadkaaga. Laga soo bilaabo waqtiga aan ururinno jawaabahaaga, hadafkayaga - iyo waajibka sharciyeed - waa in aan si aamin ah u ilaalino. Tiknolojiyadda Xafiiska Tirakoobka waxaa ilaaliyaa habab xoogan oo sugan lehna oggolaansho taas oo si dhameystiran loo "qufulo" si ay u galaan oo keliya shakhsiyaadka sida buuxda loo caddeeyay ee u carbisano xogta iyo ilaalinteeda. Shakhsiyaadkani waxay hubiyaan inay muquuniyaan halista khataraha iyo horumarinta amniga.

Si kasta oo aad u jawaabto, macluumaadkaagu waa ilaashan yahay.

Xafiiska Tirakoobka ayaa u qaabeeyey hanaanka aruurinta macluumaadka nidaamyo amni oo lagu ilaalinayo macluumaadkaaga.

Haddii aad ku jawaabto online, taleefan, boosto, ama haddii shaqaale tirakoob kuugu yimaado gurigaaga, macluumaadkaaga ayaa lasoo ururinayaa, oo la gudbinayaa loona haynaa si ammaan ah inta hawshu socoto. Markaad ku sugan tahay boggayaga ilaashan, waxaad ka xaqiijin kartaa inuu amaan yahay adoo hubinaya in cinwaanku ka bilaabmo 'HTTPS' oo ay la socoto astaanta qufulka ah. Haddii uu ku soo booqdo shaqaale tirakoobka ah, ogow in tikniyoolajiyadda ay adeegsadaan ay leedahay awood amni oo sugan, isla markaana ay si buuxda u waafaqsan tahay heerarka u degsan nidaamka Federaalka.

Xafiiska Tirakoobku wuxuu lashaqeeyaa sirdoonka federaalka ilaalinta internetka iyo khabirada shirkadaha si looga taxadaro khataraha soo kordha ee internetka si joogto ahna loogu cusbooneysiyo ilaalintooda iyo loona dhawro macluumaadkaaga.

Nagala soo xiriir:

@uscensusbureau

Macluumaad dheeraad ah:

2020CENSUS.GOV

**Shape
your future
START HERE >**

United States®
**Census
2020**